

PEP-RAPPORTEN

Wargelinta Ururka samafalka [Pep-rapporten] waa baaritaan-cilmiyeed oo sannadka kasta la hirgeliyo. Baaritaanada waxaa fuliyaan Ururka samafalka [Pep-rapporten] wadajir Machadka Karolinska [Karolinska Institutet] iyo Machadka [SOM-institutet] ee Jaamacadda Göteborg. Xitaa Ururka Wadnaha-Sambabadaha [Hjärt-Lungfonden] wuxuu taageero siiyaa mashruuca.

Hadafka baaritaanka laga leeyahay, ayaa wuxuu yahay in la helo muuqaalka guud ee hab-dhaqanada ee xiriirka la leh caafimaadka ee ilmaha iyo dhallinyarada ku nool dalka Iswiidan, iyo in muddo la tixraaco xaaladahooda. Waxaan ku rajo wayn nahay in natiijada baaritaanka aan u adeegsanno, sidii aan u hagi lahayn isbeddelada bulshada, oo ilmaha iyo dhallinyarada lagu siin doono korniinka fursadana ay ku noolan lahaayeen noolal firfircoon oo caafimaadka u roon.

Sannad kasta waxaa la xusha tiro ka qaybagaleyaal oo aan kala sooc lahayn, kuwaasoo hab ikhtiyaari ugu qaybgalo. Laakin waxaan jeclaan lahayn in tirada ka qaybgaleyaasha ay badato, taasoo sare u qaadi doonto tayada natiijadada baaritaanka.